# XAQA LOO LEEYAHAY WAXBARASHO IYO SHAQO

Warqadahaan waxaasoo saaray iskaashiga u dhaxeeya hay'adda isuduwidda qaxootiga Genevaiyo Rugta Sharci dejinta ee jaamacadda Geneva. Waxay ku wajahan yihiin caruurta aan qaan gaarin iyo kuwa qaan gaarka ah ee aan lala socon oo ku nool Geneva. Waxay uyeedadooda tahay in ay ku wargeliyaan sida ugu fudud xuquuqaha qaarkood ay ku leeyihiin bulshada dhexdeeda. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo faahfaahin , waxaad kala socon kartaa buug-yaraha ku yaal xuquuqda loo dajiyay dhallinyarada muhaajiriinta aan lala socon ee Rugta Sharciga.

**Sharaxaad**

Xaqa waxbarashada waa xuquuq waxbarasho iyo tababar.

Waxbarashada khasabka ah ayaa aas-aas u ah nidaamka waxbarashada dugsiyada waxaana ku jira waxbarashada aasaasiga ah iyo dugsiyada sare. Waxay khuseeysaa carruurta deggan Switzerland, dhammaan jinsiyadaha la isku daray, isla markaana ilmaha joogo Switzerland in ka badan saddex bilood waa MNA oo ah (carruurta waxaa loo arkaa inay deggan yihiin Switzerland). Tani ma khusayso dadka dà'da weyn, marka laga reebo xaalado gaar ah.

Halkan hoose waxaa lagu soo koobay fursadaha kala duwan ee tababaro ee gobolka Geneva:

**TERTIARY LEVEL (WAXBARASHO XIRFADEED SARE OO UKALA BAXDO)**

**WAXBARASHO XIRFADEED SARE**
- Advanced Federal Diploma
- Federal Diploma
- **College of Higher Education**: Diploma HF

**DUGSI TAQASUS**
- **University of Applied Science**: Bachelor, Master
- **University of Teacher Education**: Bachelor, Master
- **University ETH-EPF**: Bachelor, Master, PhD/Doctorate

**UPPER SECONDARY LEVEL (DUGSI SAREE)**

**VOCATIONAL EDUCATION AND TRAINING (APPRENTICESHIP)**
- **Federal VET Diploma** or Federal VET Certificate
- **VET with Federal Vocational Baccalaureate**

**GENERAL EDUCATION**
- **Specialised Baccalaureate**
- **Specialised Middle School**
- **Maturity certificate**: Academic Upper Secondary School

**ACCES II**

Reception classes, vocational guidance classes, vocation integration classes, school integration classes

**DUGSIGA DHEXE**
**DUGSIGA XANAANADA**
**DUGSIGA HOOSE**

**WAXBARASHADA QASABKA AH**

# XAQA LOO LEEYAHAY WAXBARASHO IYO SHAQO

Shahaadadaada ayaa go'aamisa fursadahaaga helitaanka waxbarasho jaamacadeed. Haddii aadan si toos ah u geli karin jaamacadahan, waxaa jira fursadoaad ku biiri karto la amahaan (imtixaanka dheerigaah ee albaabada fura ,shaqada xirfadeed, iwm.). Intaa waxaa dheer, mid kasta oo ka mid ah tacliinta sare waxay leedahay shuruudo ogolaansho u gaar ah. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah boggan:-Orientation.ch.

**Ma la ii ogol yahay in aan aado dugsi ?**

Waxaad xaq u leedahay inaad iskuul aado, waana qasab, haddii aad degan tahay Switzerland in ka badan seddex bilood oo aad ku sugan tahay magaalada Geneva, tababarka waa qasab ilaa 18 sano.

Waxaa jira Adeegga soo dhaweynta waxbarashada dhexdhexaadka sare II (ACCES II), oo loogu talagalay ardayda soo galootiga ah ee allophone-ka ah ee da'doodu u dhaxayso 15jir iyo 19jir. Wax shuruud ah loogama baahna in lagu biiro fasallada soo dhaweynta. ACCESS II waxa uu ka kooban yahay fasalo soo dhawayn ah, fasalo hanuunin xirfadeed (COP), fasalada is dhexgalka xirfadeed (CIP of schoolintegration classes (CIS).

Middaku saabsan Dugsiga aqoonta guud iyo Kuleejooyinka, ama si aad u dhexgasho tababar shaqo ama tababarguud, waa inaad ka gudubtaa imtixaanada aasaasigaah (TAF) ama (qiimaynta kombayuutarka ee aqoonta dugsigaImtixaanka EVA).

Haddii aadan lahayn aqoonta luuqadda ee lagama maarmaanka ah, waxaad heli kartaa taageero ku habboon xaaladdaada:- waxaad xaq u leedahay waxbarasho kugu filan. Waxa kale oo aad xaq u leedahay hoy, haddii aad leedahay baahi waxbarasho oo gaar ah, gaar ahaan adeegga soo dhawaynta, ilaa da'da 20 sano. Si kastaba ha ahaatee, is dhexgalka guud waa inmudnaan la siiyaa xataa ruuxa dugsiga dhigta.

**Xaaq ma u leedahay in aan sameeyo tababar shaqo ?**

Waxaad xaq u leedahay in aad samayso tababar shaqo (sidoo kale loo yaqaan tababar xirfadeed) haddii aad jirto ugu yaraan 15 sano oo adiga ama wakiilkaaga sharci aad ogolataan. Waxaad samayn kartaa tababar shaqo waqti-buuxa ama laba-track. Shuruudaha ayaa xoogaa ka duwan labada qaab-dhismeedka.

Waxaad samayn kartaa tababar waqti-buuxa ah haddii aad ku nooshahay Geneva oo aad leedahay heerka waxbarasho ee looga baahan yahay qaybta, iyada oo aan loo eegin sharci ku joogaaga (permis). Tirada boosasku si kastaba ha ahaatee waa xaddidan tahay, sidoo kale da'du. Waxaad xaq u leedahay inaad samayso shaqo-barasho laba-track ah haddii aad leedahay qandaraas shaqo-barasho, xaqa aad u leedahay inaad gasho shaqo faa'iido leh ama mushaar (ogolaansho B, F) iyo haddii heerka dugsiga ee looga baahan yahay koorsada su'aashu tahay la helay. Oggolaanshaha N, waa lagama maarmaan in laga helo ogolaanshaha shaqada OCPM da tanina ma fududa.

# XAQA LOO LEEYAHAY WAXBARASHO IYO SHAQO

| | Tababar mataaneysan | Barashada lagu qaato dugsiga (waqti buuxa) |
|---|---|---|
| **Qaabka waxbarashada** | Tababarka aragtida waxa uu ka dhacayaa rugta dugsiga (1 ama 2 maalmood todobaadkiiba) iyo tababar ka dhacaayo rugta shariikadaha (3 ama 4 maalmood todobaadkiiba) | Tababar aragtiyeed iyo midda gacanta oo lagu qabanaayo dugsiga dhexdiisa taxadir!:- tani waxay u gaartahay xirfadaha qaarkood! |
| **Shuruudaha gelitaanka ama aqbalka tababaryada** | Waa inaad haysataa heerka waxbarasho ee qaybtan looga baahan yahay.<br><br>Taas waxay u egtahay shaqo raadis:- waa inaad heshaa shirkad tababar oo ku qaadan doonta ka dibna ku tababari doonta muddada tababarka (2 sano oo AFP ah iyo 3-4 sano CFC). Heshiiska shaqo-barasho waxaa markaas saxiixaa shirkadda iyo qofka dhallinyarada ah iyo sidoo kale wakiilkiisa ama wakiilkeeda. Qandaraaska waa in ay ogolaato OFPC oo mas'uul ka ah diiwaangelinta. | Waa inaad haysataa heerka waxbarasho ee qaybtan looga baahan yahay.<br><br>Udhiganta fasaxyada dugsiyada<br>Dugsiyadu waxay doortaan qaabkooda gelitaanka laakiin badanaa, waxay ku saabsan tahay imtixaanada ogolaanshaha.<br><br>Fadlan ogow inay jiraan waqtiyo kama dambays ah oo la ixtiraamayo maadaama boosasku kooban yihiin. Mabda 'ahaan, da'da ugu weyn waa 20 sano. |
| **Sharciga aad qabtid** | Sharciga B ama F<br><br>Sharciga N, waa lagama maarmaan in laga helo ogolaanshaha shaqada OCPM tanina ma fududa. | Sharci kasta |
| **Fasaxyada** | ugu yaraan waa inuu 18 jir yahay 5 todobad sanadkiiba | Udhiganta fasaxyada dugsiyada |
| **Mushahaar** | Mushaharka ay bixiso shirkadu | Mushaar ma jiro |

# XAQA LOO LEEYAHAY WAXBARASHO IYO SHAQO

Haddii aadan lahayn sharci ku joog, waxaad heli kartaa oqolaanshaha jooqitaanka adigoo dhex jooga xaalado aad u xaddidan, waxaad samayn kartaa keliya in aad qabato, barasho xirfadeed ama tababareed.

Marka , waxaad samayn kartaa tababar shaqo ah muddo ugu badnaan saddex toddobaad, iyada oo aan too eegin xaaladda deggenaansho. Xafiiska hagidda, farsamada gacanta iyo tababarkajoogtada ah (OFPC)wuxuu bixiyaa meel aad ka heli kartotalooyin iyo macluumaadyo, oo loo yaqaan Cite des metiers halkaas oo aad ku shaqayneyso lacag la'aan waxadna tageysaa ballan la'aan - si xirfadlayaasha ay kuugu caawiyaan inaad heshoraadadyo, oo ku xiran danahaagaiyo kartidaada. Goobta Cité des Métiers, waxaad mar kale ka heli kartaa in laguu xagaajiyo CV-gaaga iyo warqaddaada dhiirigelinta (lettre de motivation). Waxaad heli kartaa jawaabo iyo su'aalahaaga ku saabsan barashada tababarkaaga ama xirfadaada, layliyo ama tababaro kale.

**Xaq ma u leeyahay inaanshaqeeyo ?**

Waxaad xaq u leedahay inaad shaqeyso laga bilaabo da'da 15 jir. Wakiilkaaga sharci waa inuu ogolaado inuu saxiixo heshiiskaaga shaqo (ton contrat de travail),kuwa loo-shaqeeyo waxay ka heli karaan dhammaan macluumaadyada muhiimka ah sitkan : https://www.ge.ch/demander-permis-travail/titulaire-livret-f-b-refugie

lyadoo ay ku xiran tahay sharci ku joogaaga. Shuruudaha ama xaaladaha way kala duwan yihiin. Haddii aad haysato ogolaanshaha B ama F, kuwa too shaqeeyo waa inay ku wargeliyaan ka qaybgalkaaga shaqo madaxda. Haddii aad haysato ogolaanshaha N oo aad ka hesho meel ka baxsan xarunta federaalka, waa inaad sidoo kale ka hay'sataa ruqsad shaqo. Haddii shaqada lagaa saaro ama aadan haysan sharci ku joog, mabda'a ahaan xaq uma lihid in aad shaqeyso.

# XAQA LOO LEEYAHAY WAXBARASHO IYO SHAQO

**Maxaa dhacaya haddii aan ka weynahay 18 ?**

Waxaa jira koorsooyin tababar gaar ah oo loogu talagalay dadka waaweyn oo joojiyay waxbarashadooda, taasoo u oggolaanaysa inay dib ula qabsadaan, ama... si ay ugu dhammeeyaan dugsiga dhaqanka guud ee dadka waaweyn (ECGa) iyo dugsiyada dadka waaweyn. Waxaa loogu talagalay ardayda 19 ka weyn ee aan heli karin nidaamka soo jireenka ah. Waa inaad haysataa ugu yaraan heer u dhigma kan dugsiga sare si laguugu ogolaado, iyo hal sano oo khibrad shaqo ah.

Waxaa kaloo jira tababaro kale iyo noocyo kale oo xirfadaha lagugu aqoonsado (tusaale, nidaamka Shahaadaynta Dadka Waaweyn, kaas oo kuu ogolaanaya inaad hesho AFP ama CFC ku salaysan khibrad xirfadeed iyo .sc-) u' .=: shuruudaha qaarkood). Waxaad si toos ah wax uga weydiin kartaa Cité des Métiers.

**Jaamacad ma la ii oggol yahay ?**

Haddii aad haysato shahaado II dugsi sare ama nooc u dhigma, waxaad geli kartaa Jaamacadda/HES. Haddii aadan haysan shahaado dugsi sare ama taada aan la aqoonsanayn, waxaad arji u qoran kartaa gelitaanka haddii aad ka weyn tahay 25 sano oo aad leedahay khibrad shaqo. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jiri kara imtixaano dheeri ah iyadoo ku xiran wixii aad soo martay gaar ahaan imtixaanada Faransiiska.

Iyada oo ku xiran xaaladdaada dhaqaale iyo tan waalidkaa, waxaad heli kartaa deeq waxbarasho (bourse d'ètude) oo dawladeed ah. Tani waa suurtogal haddii aad ka diiwaangashan tahay Jaamacadda/HES, inaad haysato ogolaanshaha B iyo inaad joogtay Geneva muddo 5 sano ah. Tani sidoo kale waa suurtogal haddii aad tahay qaxooti la aqoonsan yahay (ogolaansho qaxooti B, qaxooti F ama ogolaansho F). Haddi aanay taasi arintu ahayn, waxa kale oo jira hay'ado ama ururo gaar ah oo kaa caawin kara dhaqaale ahaan waxbarashadaada.

# XAQA LOO LEEYAHAY WAXBARASHO IYO SHAQO

**Cinwaayno iyo macluumaadyo**

**Ku saabsan Ogeysiin iyo hanuunin:**

- **Cité des métiers:** waa goobta qaabilaadda iyo macluumaadka oo u furan dadka shaqo doonka ah, waana bilaash oo ballan la'aan ah:- macluumaadyo ku saabsan layliyo ama tababaro, shaqo-barasho, aqoonsiga shahaadooyinka ajnabiga ah, aqoonsiga xirfadaha, gacan siinta qorista CV-yada iyo waraaqaha dhiirigelinta, iwm.

- **www.orientation.ch :** waxaad ka heli kartaa liiska boosaskatababarada (métiers) iyo macluumaadyo ee gudaha Switzerland, iwm. Waxaad ka heli doontaa macluumaadyo ku saabsan nidaamkatababarka oo ku qoran dhowr luqadood oo ajnabi ah : https://www.orientation.ch/dyn/show/13772?id=8

- **Layliyo :** macluumaadyo ku saabsan layliyodaahfurka (dhowr maalmoodilaa dhowr toddobaad) : https://www.citedesmetiers.ch/thematiques/formations-et-metiers/des-stages-pour-sinformer-sur-les-professions/

**Barashada Faransiiska :**

- **www.francais-integration.ch :** hagaha khadka tooska ah ee Faransiiska iyo koorsooyinka akhris-qoraalka

- **Jaamacadda Shaqaalaha ee Geneva ( U.O.G.) :** Xarunta waxbarashada dadka waaweyn.

- **Bonjour Genève :** halkee looga tababaraa Faransiiska Geneva? Waxaad ka heli doontaaxiriirkan jaaliyado kala duwan oo bixiya casharoFaransiis ah oo lacagla'aan ah.

**Looqu tala qalay Jaamacadda Genéveiyo duqsivada sare :**

- **Horizon académique :** barnaamijka isdhexgalka tacliineed ee xirfadeed iyo bulshasheed. Barnaamijka waxaa loogu talagalay dadka ku jira goobta magangalyada (N, F, B ama C ogolaanshaha qaxootiga), iyo ogolaanshaha isukeenida qoyska B kuwaas oo horey dalkooda uga soo dhammaystay jaamacad oona raba inay sii wataan waxbarasho sare (Uni / HES) ee Switzerland.

- **Waqtiyada joogtada bilaashka ah ee shirarkajaamacadda ururada ardayda,(CUAE)**